

SHARCIGA KALLUUMAYSIGA SOOMAALIYA

SOMALIA FISHERY LAW N0-23 30-11-1985

Sharciga Kalluumaysiga Soomaaliya Law No. 23 ee soo baxay 30 November 1985

- [Somali Fishery Law No 23 of 30 November 1985](#)

Maadaama ilaalinta iyo beekhaaminta kalluunku uu muhiimad weyn u lahaa Soomaalida, waxaa dawladdii Soomaaliya soo saartay Xeerka Kalluumaysiga oo lambarkiisu ahaa N° 23 ee soo baxay 30kii November 1985 ([kaas oo ka diiwaan gashan Qarammada Midoobey /FAO](#)), xeerkaas oo qeexayay maraakiibta iyo shakhsiyaadka la siiyo shatiga ee ka kalluumaysanaya baadda Soomaaliya in ay dhawraan xeerkaas, islamarkaasna ay soo sheegaan inta ay leegtahay kalluunka ay badda kala soo baxeen iyo nidaamka ay adeegsadeen. Ciddii xeerkaas ku xadgudubtana ay la kulmayso ganaax adag ama xabsi. Waxaa xeerkaas ku cad in:

- Ganaax gaaraya ilaa So.Sh. 10,000 laga qaadayo doonta aan matoorka lahayn ee xeerkaas ku xadgudubta.
- Ganaax dhan So.Sh. 15,000 ilaa So.Sh. 4,000,000 laga qaadayo doonyaha uu saaran yahay matoorka baaxadiisu dhaxayso 6 HP (HorsePower) ilaa 101 HP.
- Xabsi 3 ilaa 10 sano ah ama ganaax **So.Sh. 5,000,000 ilaa So.Sh. 50,000,000**, ama in la isugu daro xabsi iyo ganaax, qofkii kalluumaysiga u adeegsa waxyaabaha qarxa, ama adeegsada aalad mamnuuc ah, ama kalluumaysta xilliga xirmada ee aan la ogolayn in kalluunka la dabto, ama soo jillaabtay kalluun mamnuuc ay tahay in la soo qabto.
- (FG: Xilligaas 1985 qiimaha sarrifku wuxuu ahaa US\$1 = 36 So.Sh. Sidaas daraadeed 50 million So.Sh waxay u dhigaantey 1.4 million doolar.)
- Akhri: [Somali Fishery Law N° 23 of 30 November 1985](#)